TIPS FOR PARENTS

# Parent-Teacher Interviews



## Talooyin loogu talagalay iswareysiga waalidiinta iyo macallimiinta

Iswareysiga waalidiinta iyo macallimiinta sannadkiiba, labo ama saddex mar ayaa dabayaaqada semistar kasta la qabtaa, (term), oo marka kaararka warbixiinada guryaha loo diro. Waana fursado ay waalidiinta iyo macallimiintu si wada jir ah uga hadlayaan, sidii ay ilmo walba ku caawin lahaayeen guusha dugsigooda. Waana wakhti aad u kooban, badanaaba waa 10 illa iyo 15 daqiiqo. Waxa aad mihiim u ah, kulanka iswareysiga ka hor, in aad is diyaarisaan, si looga fa'deysato wakhtigaas aad u kooban. Haddii aad wakhti dheeraad ah u baahantihiin, waxaad qorsheysaan ballan kale.

### 1. Qorsheeya

Kaarka warbixinta ilmiha soo akhriya. Siina qorta waxa ku saabsan su'aalihiina iyo dareenkiinba. Warbixinta wixii ku saabsanna ilmihiina kala sheekeysta. Waxaad doonaysaan in aad macallimiinta weydiisaan, qoraal taxane ah diyaarsada.

### 2. Su'aalo weydiiya

Wakhti ku imaada. Taxanihiina su'aalaha la imaada. Macalimiintu waxay idin kala hadli doonaan kararka warbixinada ilmihiina ama idin tusi doonaan qeybo tusaalooyin ah oo hawlaha wiilkiina ama gabadhiina. Macallinka/da u sheega waxay ilmihiinu arrimaha dugsiga ka daneynayaan ama ayna jecleyn. Macallinka/da la socodsiiya haddi shaqada ama waajibaadka gurigu ay ku badanyihiin ama ku yaryihiin. Kulanka iswareysiga waalidiinta iyo macallimiintu waa kuwu sir ah. Macallimiinta la wadaaga arrimaha idiin gaarka ah oo saameynaya ilmihiina horumakooda ama akhlaaqdooda ee dugsiga. (Tsle: Xanuunada / jirrada qoyska, shaqo raadinta, iwm). Xogwarrankiinuna wuxuu macallimiinta ku kaalmeynayaa inay ilmihiin si dhab ah u fahmaan.

- Muxuu ilmahaygu ku fiican yahay?
- Waa maxay khibradaha wali ay u baahanyihiin (isagu ama iyadu) inay horumar ku gaaraan?
- Ilmahaygu kaalmo dheerada ah miyuu helaa?
- Muxuu yahay nidaamkiina shaqada gurigu, ama waajibaadka? Wakhti intee in le'eg ayuu ilmahaygu u baahanyahay inuu waajibaadka guriga ugu guddto?
- Sideebu ilmahaygu ardeyda kale ula dhaqmaa?
- Sideebaan ilmahayga guriga ugu caawin karaan?
- Waa maxay qaabka ugu wanaagsan ee aan idin kula xiriiri karayo, haddii aan su'aalo qabo?

Qodobada kulantida iswareysiga wax ka sii qorta, si aad uga wada xaajootaan idinka iyo ilmihiina.

### 3. Amba qaad – (ka daba taga)

Ka wada hadla arrimaha ugu wanaagasan ee macalimiinta ay ka sheegeen isku buugsanaata ilmihiina. Ka hadla sida idinka iyo macallimku aad ilmihiina uga cawin laheydeen arrimaha u baahan in la daryeelo.

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

Copies are available in several languages at *www.peopleforeducation.com.*

For more information, call 416-534-0100 or email: *info@peopleforeducation.com*
© People for Education 2009
The Ontario Trillium Foundation
La Fondation Trillium de l'Ontario

toronto community foundation